

Student Name: _____, I.D. #: _____

Waalidka/Koriyaha Qaaliga ah,

TAGITAANKA DUGSIGU WAA WAX SHARCI AH

- Sharciga Gobalka ayaa dhigaya in carruuta da' doodu tahay 8 ila 17 khasab ku tahay in ay dhigtaan dugsiga.
- Carruurta da' doodu tahay 6 ama 7 jir ee dugsiga la qorey waa in ay iyaguna tagaan.
- Kurayda 16 jir ka ah ama ka weyn waxa dhici karta in dugsiga tegista laga dhafi karo haddii ay waafaqaan shuruudo loo baahan yahay. Haddii aad doonayso in aad falanqayso shuruudahan, fadlan la xidhiidh Ryan Bunda, school counselor, at 425-298-5329/ Ryan.Bunda@highlineschools.org.

Haddii uu ilmahaagu dugsiga ka maqnaanayo, fadlan la soo xidhiid Meghan Moreno, office assistant, at 206-631-4300/ Meghan.Moreno@highlineschools.org.

*Sharciga dugsiga ka maqnaanshaha (truancy) ku saabsan oo tafatiran waxa laga heli karaa "RCW 28A.225" doorona ta u horaysa (first option).

MAS'UULIYADA DUGSIGA KA SAARAN ILMA MAQNAADA

- Haddii ilmuhu dugsiga ka maqnaado laba jeer oon cudurdaar lahayn bil gudaheed, sharciga gobolku (RCW 28A.225.020) waxa uu dhigayaa in adiga iyo ilmahaaga lala yeesho wadahadal (conference)
- Marka lagu jiro dugsiga hoose shan jeer oo maqnaansho cudurdaar leh dabadeed, ama toban ama ka badan oo aan cudurdaar lahayn sanadka gudahiiis, dugsiga gobalka waxa laga doonayaa in ay idinla soo xidhiidhaan oo idinla yeeshan wadahadal (conference). Looma baahna in aad dugsiga wada-hadal la yeelataan (conference) hadii ilmahaagu keeno warqad dhakhtar, ama warqad cadaynaysa in aad hore dugsiga ugu qoraal ahaan ugu sheegteen in ilmuhu dugsiga ka maqnaandoono.
- Haddii ilmahaagu dugsiga ka maqnaado todoba jeer oo cudurdaar la'aan ah bil gudaheed ama toban jeer oo cudurdaar la'aan ah sanad ka guda hiis, waxa nalooga baahan yahay in aanu Maxkamada Carruurta (Juvenile court), u gudbino andaco odhanaysa waxa uu buriyey qodobka RCW 28A.225.010, oo ah sharciga ilmaha ku khasbaya in uu dugsiga dhigto. Waxa dhici karta in aad adiga iyo ilmahaaguba iman doontaan Maxkamada Carruurta.

MA OGTAHAY?

- In dugsiga la tago sacada uu bilaabmo, maalinta oo dhan la dhigto, maalin kastana la joogo ilmahaaga waxa ay u sahlaysa in uu dugsiga sare dhamaysto (qalin jabiyo)
- Laga bilaabo xanaanada (kindergarten), dugsiga oo la tagi waayo bishii laba jeer, cudurdaar ama cudurdaar la'aan waxa ay keeni kartaa in ilmahaagu dugsigii si fiican ula qabsan waayo xisaabta iyo akhriskana marka uu gaadho fasalka saddexaad.
- Marka la gaadho fasalka 6aad, dugsiga tagis la'aantu waxa ay mid ka tahay saddex calaamadood midkood oo ah in ilmaha ay dhici karto in dugsiga ka tago.
- Dugsiga ka maqnaanshahu waa calaamad muujinaysa in ilmuhu dugsiga ka xiise dhacay, shaqadii dugsiga ku adkaatay, dugsiga lagu daandaansado (bully) ama ay lasoo darsen arrimo kale oo khatar weyn leh.
- Marka la gaadho fasalka 9aad, dugsiga tagis joogto ahi waxa ay saadaalinaysaa in ay u badan tahay in ilmuhu dugsiga sare ka qalinjabiyo.

WAXA AAD SAMAYN KARTO

- Ilmahaaga ha u ogalaan in ay guriga joogaan iyaga oo run ahaantii buka mooye, xumad/qadho, matag, shuban, ama furuuruc laga qaadayo.
- Iska ilaali in aad balamo samaysataan ama dhooftaan wakhtiga dugsiga la dhiganayo.
- La soco ilmahaaga dugsiga tegistiisa. Ka maqnaansha dugsiga in ka badan 9 maalmood oo cudurdaar leh ama aan cudurdaar lahayn, waxa ay keeni kartaa in ilmuhu saaqido.
- U deji waqti joogta ah oo ay habeenkii seexdaan, subahiina toosaan iyo mid kale oo ay isna shaqada guriga lagu sameeyo (homework) iyo in shandada-dhabarka (backpack) habeenimada sii xidhxidhaan.
- Diyaarso qof aad qaraaba, saxiib, jaar ama waalid ah oo ilmaha dugsiga geeya haddii wax kugu soo kordhaan.

Haddii ay kugu adkaatay sidii uu ilmuhu dugsiga u dhigan lahaa, sababtuna waxa ay doonto ha ahaate, halkan waxa aanu u joognaa in aanu ku garab istaagno oo aanu kaala shaqayno sidii xal loo heli lahaa. Fadlan haka gaabin in aad nala soo xidhiidho oo aad balan noola samaysato si aynu u falanqayno dugsiga ka maqnaanshaha ilmaha. Charliesha Cox, office manager, at 206-631-43001/ Charliesha.Cox@Highlineschools.org

Sincerely,
Alexandria Haas
Principal

Saxeexaaga hoosta ku qorani waxa uu muujinayaa in aad warqada akhriday (ama qof kale kuu akhriyey) aad fahamtayna.

Saxeexa: _____, Magacaaga oo aad daabacday: _____, Taariikhda: _____

*Warbixin caawimo badan oo ku saabsan dugsiga imaatinka waxa aad ka heli karta: www.attendanceworks.org